

Nadaafadda cuntada

Ganacsiyada iibinaya cuntada ee furan ama dib loo furayo waa inay hubiyaan in dhammaan hubinada nadaafadda cuntada ay yihiin kuwo cusbooneysiisan.

Liiska Hubinta ee Muhiimka ah

- ☑ **Hubi shirkadaada biyaha** - wixii khatarada legionella la xiriira ka eeg <https://www.hse.gov.uk/news/legionella-risks-during-coronavirus-outbreak.htm>
- ☑ **Hubi in qalabkaaga kululeynta biyaha kulul uu shaqeynayo** iyo inaad heysato biyo kulul iyo biyo qabow ee dhammaan meelaha iyo weelasha gacmaha lagu dhaqdo.
- ☑ **Gaaskaaga iyo korontadaada ma leeyihiin badbaado?** - Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad adeegyadaas ay kaa tijaabiyaan xirfadlayaal diiwaangashan.
- ☑ **Xaqiiji in meelaha laga baxo xilliyada dabka ay cad yihiin** tusaale ahaan, aan oolin kuraas iyo miisas hortooda.
- ☑ **Qandaraaskaaga qashin uruurinta wali ma shaqeynaya?** Weelasha qashinka lagu aruuriyo ma ku sugan yihiin xaalad wanaagsan? Ma jirtaa meel weelasha qashinka lagu kaydiyo oo nadiif ah oo hagaagsan?
- ☑ **Ka hubi dhismahaaga astaamaha dhaqdhaqaaqa cayayaanka ama meelaha ay ka soo geli karaan.** Tixgeli inaad shirkad la gasho qandaraaska ka hortagga cayayaanka/sahaminta goobta shaqada kahor dib u furitaanka.
- ☑ **Qalabyadaada ma shaqeynayaan** (qaboojiyeyaasha, firinjeerada, makiinadaha wax karinta, mashiinka kululeynta cuntada, nidaamka soo saarista, qalabka keydinta waxyaabaha kulul).
- ☑ **Hubi qalabka kormeerka** tusaale ahaan in heerkulbeegyada, qaboojiyaha iyo heerkulbeegga qaboojiyaha ay nadiif yihiin oo ay shaqeynayaan. Sax cabirka heerkulbeegyada baaritaanka adiga oo isticmaalaya baraf iyo biyo karkaraya.
- ☑ **Si fiican oo qoto dheer u nadiifi** oo jeermiska ka dil dhamaan dhismayaasha (dhamaan qalabyada & maacuunta).
- ☑ **Faaruji wixii mashiin barafeed ah** oo si fiican u nadiifi oo jeermiga uga dil ka hor intaadan buuxin.
- ☑ **Si fiican u nadiifi oo u dhaq mashiinka dharka lagu dhaqo** iyo makiinadaha galaasyada lagu dhaqo marka ay madhan yihiin wareegga ugu kulul ka hor intaadan isticmaalin.

- ☑ **U fiirso taariikhaha isticmaalka** iyo taariikhaha ay tahay kahor in sheyga la isticmaalo oo iska tuur wixii duug ah.
- ☑ **Hubi in qalabka wax lagu baakadeeyo** ay wali yihiin kuwo wanaagsan, nadiif ah oo ku habboon in la isticmaalo.
- ☑ Hubso in **dharka shaqaalaha**, mariyaha shaqaalaha iyo qalabka ilaalinta shaqsiyadeed ay xaaladdooda wanaagsan yihiin oo ay nadiif yihiin.
- ☑ **Dib-u-eegis ku sameey oo cusboonaysii** Nidaamka Maareynta Badbaadada Cuntada tusaale ahaan, Cunto Badbaado Leh Ayaa Ganacsi Fiican Samaysa, si loo muujiyo wixii isbeddel ah ee ku yimaada meheraddaada. <https://www.food.gov.uk/business-guidance/safer-food-better-business-sfbb>
- ☑ **Tixgeli waxyaabaha kiciya xasaasiyadaha** - wax isbedelo ah miyaa lagu sameeyey meenuuga, wax ka bedel dhanka alaab-qeybiyaha ah ama dhanka maaddooyinka cuntada ah oo macnaheedu tahay in macluumaadka waxyaabaha xasaasiyadda keena ee aad bixiso loo baahan yahay in la cusbooneysiyo? U cusbooneysi hadba sidii loogu baahdo. <https://www.food.gov.uk/business-guidance/allergen-guidance-for-food-businesses>
- ☑ **Dib u eeg oo cusbooneysi jadwalkaaga nadaafadeed** si ay uga mid noqoto baahida loo qabo nadiifinta badan ee miisaska, kuraasta, albaabbada iyo meelaha kale ee gacmaha taabashadoodu ku badan tahay. Hubi in kiimikooyinku yihiin kuwo aanu dhicin oo iska tuur wixii kimikal ah ee halaaba kahor xiritaanka meherada.
- ☑ Tababarka shaqaaluhu ma yahay mid casriyaysan, oo ay ku jiraan tababar ku saabsan habraacyada COVID 19? Tusaale ahaan gacmo dhaqid joogto ah. <https://www.nhs.uk/live-well/healthy-body/best-way-to-wash-your-hands/>
- ☑ Ku wargeli shaqaalaha wixii ku saabsan habraacyada ka warbixinta cudurka. Hubi jirrooyinka shaqaalaha, kuwa COVID la xiriira ama jirro iyo shuban.

Wixii macluumaad dheeraad ah eeg <https://www.food.gov.uk/business-guidance/reopening-checklist-for-food-businesses-during-covid-19>

Kafiiri boggeena Kheyraadka Ganacsiga wixii boostaro ama liisaska hubinta ee wax ku oolka ah- waxaad ku heli kartaa Ingiriis iyo 9 luqadood oo kale
www.sheffield.gov.uk/home/business/coronavirus-business-resources/

www.sheffield.gov.uk/coronavirus-business